

Machadka qarameed xilka iyo hawlshiisa

Machadka qarameed (SiS, Statens institutionsstyrelse) waa hay'ad dowladeed xilkooduna uu yahay xanaanaynta dhallinyarada da'doodu u dhaxeeyso 12jir ilaa iyo 21 jir dhibaato mujtamaceed isla markaas dadka waaweyn ee si xun u isticmaal waxyaabaha xun.

Xanaanayntu badanaaba looma tixgaliyo rabidda qofka ee waxaa la fuliyaa sharica xanaanaynta da'arta (LVU, Lagen om vård av unga), sharciga xanaanada isticmaalayasha maandooriyaasha (LVM, Lagen om vård av missbrukare) iyo waliba xeerka xafiiska Bulshada (SoL, Socialtjänstlagen). Machadka qarameedka xataa wuxuu mas'uulka yahay oofinta ciqaabta dhallinyarada u dhaxeeya da'doodu 15 jir ilaa iyo 17 jir oo lagu xukumay dambi iyado loo cuskanayo sharicga xanaanaynta dhallinyarada ee kama danbaynta ah (LSU, Lagen om verkställighet av sluten ungdomsvård).

Waxaan si wada jir ah hawsha nagala shaqaynayaa xafiiska kaalmada bulshada ee degmada.

Machadka qarameed qiyaas ahaa laamihiiisu waa 40 qaybood ee waddanka oo dhan. Waxaa jir qiyaas ahaan 700 oo boos loo guna tala galay dhallinyarada iyo 350 boos oo loogu tala galay dadka waayeeyn oo si xun u isticmaal waxyaabaha xun.

Machadka qaranka shaqaalahiisu wakhti walba waa joogaan iyadoo isugu jira xirfado kala duwan iskaashanaya si ay waxtar iyo xanaano wanaagsan u helaan. Machadka qarameed shaqadiisa waxaa kale oo ku jira ilaalinta shaqooyinka ka socda laahamaha machadka qaranka. Ilaalin gaar ahaanayd dhallinyarada guryaha machadka joogta iyo sharcig (LVM-hem). Ilaalinta machadka qaranka iyo daba galka taas oo u dhacaysa hab caadi ah/qorshayn, ilaalin, markay waxii dhacana si gooni ah ayaa loo ilaalinayaa.

Machadka wuxuu ka shaqeeyaa oo kale baaritaan iyo horumarin hawsha ka socota. Cilmi baaridda iyo dhaqaalaha ku baxaya waxaa loo kala qaybiyaa jaamacadaha iyo machadyada madaxa banaan inta ay khusayso cilmi baarista machadka qarameeyd oo khibrad wayn u leh soo u ruurinta khibradaha kooxda qaabisan.

Hawsha waxaan kharashkeeda bixiya qayb dowladda iyo qaybta kalena kharashka lagu bixiyo caafimaadka. Machadka qarameed waxaa la asaasay 1993, wixii intaa ka horeeysay waxaa hawsha wadi jiray degmada, maamulka gobolka, ururka guud ee degmooyinka.

Xafiiska ugu wayn waxuu ku yaalaa Stockholm wuxuu qabtaa maamul ku lug leh qorshe sare iyo gargaarid.

Xanaanaynta dadka isticmaala maandooriyaha

Bukaansocodka maandooriyaasha ay isticmaalan waxaa ka mid ah khamriga-xashiish ama maandooriyayaal kala duwan. Mararka qaarkood muddo dheer bay isticmaalaan maandooriyayaasha. Sharciga xanaanada dadka isticmaala maandooriyayaasha (LVM) u jeedada looga danleeyahayna waa in laga badbaadiyaa khatarta noloshoodu ku sugantahay iyadoo loo daawaynayo hab raali galin ah.

Aasaaka qabashada iyadoo la fulinayo sharica xanaanaynta dadka isticmaala maandooriyayaasha LVM waxaa weeye LVM waxaa u soo gudbiya xafiiska bulshada tusaale ahaan bukaan socodka dhakhtarkiisa, ama gacanyaraha bulshada ama qofka mid ah qaraabada ugu dhaw ehel ahaan. Xafiiska bulshada ayaa baaritaan ku samaynaya hadii uu waa faqsanyahay sharicga daryeelka dadka isticmaala maandooriyayaasha markaas buu codsi samaynaya in loo sii gudbiyo maxkamada gobolka. Maxkamadaas ayaa go'aan ka gaarayso in la isticmaalo qabashada bukaan socodka.

Deganaanshaha ay leeyihin LVM waxay joogi karaan ugu badnaan muddo 6 (lix) bhood si dhakhso ah ayay ugu wareegaysaa hab furan. Tagidda waxaa lagu baarayaa dadka isticmaala maandooriyaha dhibaataada haysata iyo baahida uu qabo. Qaybta baaritaanka waxay noqon kartaa wada hadal uu la yeesho qofka aqonta u leh cilminafsiga, baaritaan diyaar ah dhinaca bulshanimada iyo xagga maskaxda baaritaankaas oo qof walba gooni loogu samaynayo qorshe daawayn.

Daawaynta iyo hababka way kala duwan yihiin xarumaha xanaanaynta isticmaala yaasha maandooriyaha iyagoo eegaya bukaan socod kasta baahidiisa. Waraysiga lala yeelanayo, daawaynta 12ka heer (tolvstegsbehandling), u tababarid dhaqan celin bulshadeed baa la isticmaalayaa. Caawimaad shaqaale qof gaar kuu ah in uu ku caawimo iyo wada hadal koox ah, kooxada ka tirsan machadka maalin kasta waxay sameeynayaan xarakaad.

Hoyga machadka isticmaalayaasha maandooriyaha waxaa loogu tala galay dad kala duwan. Tusaale ahaan waxaa jira hoyga loogu tala galay isticmaalayaasha maandooriyaasha qaabana cudurada nafsiga ah, isticmaalayaasha maandooriyaasha ee dagaalama, kuwa uurka leh ama kuwa u baahan xanaaneyn gooni ah isticmaalana maandooriyaha.

Hoygaas xanaanada dumar iyo ragba waa qaabilaa. Sannadadan dambe xanaaneynta isticmaalayaasha maandooriyaasha waxyaaba farabadan ayaa iska badalay. Tirada guryaha way yaraadeen taas ooy keentay baahidii loo qabay xafiiska kaalmada bulshada oo yaraatay. Isticmaalid maandooriyayaasha waqti dheer loogama hortagi karo muddo gaaban aad deganaato hoyga xanaaneynta isticmaalayaasha maandooriyaasha. Waxaa muhiim ah in la sameeyo wada shaqeyn ka dhaxeeysa xafiiska daryeelka bulshada ee dagmadaada, ehelka iyo kuwa kaleba sidii looga gaari lahaa natiijo wanaagsan dadka aad u isticmaala maandooriyaasha jooga meelaha lagu xanaaneeyo isticmaalayaasha maandooriyaasha.

Xanaanaynta dhallinyaradda

Dhallinyaradda lagu xanaaneeyo machadka qarameed gaar ahaan hoyga dhallinyaradda waxaa lagula wareegay ayadoo loo adeegsanayo sharciyada LVU-SoL.

Markii ilmo ama dhallinyaro la dajiyo ama lagu wareejiyo machadka qarameed ka hor waxaa inta badan raadiyay xal farabadan xafiiska daryeelka ee degmada. Waxaa ka mid ah iyadoo la dajiyaay reer qoys ah iyo hay'adaha degmada ama kuwo birifaat ah. Machadka qarameed wuxuu uga duwan yahay guryaha kale ee dhallinyarada way ka shaqo badan tahay iyo waliba leh hooy la xiri karo.

La wareejinta ku salaysan ama waafaqsan LVU laga yaabaa in ilmaha waalidkiis uuna ka helin caawimaad koritaan fiican leh qodbka 2aad oo la yiraahdo dabeecad baabaaysa ama dhallinyarada naftooda oo ku nool nolool halis ah (de så kallade miljöfallen) tusaale ahaan maandooriyaasha ama dembiila ah qodobka 3aad oo la yiraado xaalad dabeecad (de så kallade beteendefallen) khalad isticmaaliddu waxay dhalisaa khatar wayn dhinaca caafimaadka ama horumarkiisa iyo xanaanaynta uu u baahanyahay laguna siinin si mutadawacnimo ah.

La wareejinta waxaa go'aanka gaara maxkamadda gobolka baaritaan ka bacdi iyo codsi loo gudbinayo xafiiska xanaanada ee degmada. Haddii ay xaaladdu deg-deg noqoto guddomiyaha xafiiska kaalmada ayaa gaaraya go'aanka lagu wreejinayo qofkaas isla markaas waa inuu ogaysiiyaa maxkamadda gobolka.

Gaar ahaan guryaha dhallinyaradda waxaa wax lagu diyaariyaa, xanaanayn iyo daaweeyn ilmaha iyo dhallinyaradaba da'doodu u dhaxayso 12-21 jir wakhtiga ay degan yihiin waxaa la sameeyaa baaritaano soconaya qiyaas ahaan 2 bilood. Muddadan waxaa la samaynayaa baaritaan heer sare ah xallinta dhibaataada xaysata iyo dib u baarid noloshoodii dhallinyaradaas. Wixii ka baxsan baaritaan kaas waxaan ku shaqaynaynaa qorshooyin gaar ah oo qof walba sida ugu fiican ee loo daawayn karo loona xalliyo dhibaatooyinkiisa iyo baahidiisaba.

Habka daawaynta guryaha ay dhallinyaradu degan yihiin iyo baahida qof waliba way kala duwan yihiin. Daaweynta waxaa ka mid ah daweynta bayda'dda, mid qoys shaqsi ahba. Kuwa badan oo ka mid ah guryaha xanaaneynta dhallinyarada waxay sidoo kale isticmaalaan habka daaweynta labiyo tobankka heer "tolvstegsbehandling" maadaama dhallinyaro fara badan dhibaatooyin waaweyn ka haysato maandooriyeyaasha.

Kaalin weyn oo ka mid ah dhaqan celinta ama daweynta waa dhigashada iskuulka. Dhallinyaro badan baa khibrad xun ka haysta iskuulada caadiga waxayna fursad u haystaan in ay waxbarashadooda ka dhamaystaan dugsiyada ka furan machadka qaranka. Cashar bixntu waxay u dhacdaa kooxo yar-yar iyo macaliimiin joogta ah marwalba. Dhallinyarada ka tirsan machadka waxaa loo ogol yahay in ay ka dhamaystaan waxbaarashada dugsiga hoose-dhexe, qaarkoodna dugsiga sare ayayba ka dhigan karaan.

Mudadda deganaanshaha machadka gaar ahaan guruhaha dhallinyarada waxay noqon kartaa dhowr usbuuc markii si deg-deg ah loo dajiyo ilaa iyo sannado fara badan marka daawayn awgeed loo dajiyo. Ujeedada looga danleeyahay xanaanaynta waa inuu ilmahu gurigiisii ama meesha uu deganaa si caadi ah ugu noqdo. Sidaas daraadeed ayaa xafiiska bulshadu ula

soconayaa xanaanayntiisa oo 6dii biloodba warbixin ka soo gudbinayaa inuu wali u baahan yahay iyo in laga joojiyo.

Goobaha xanaaneynta waxaa dhammaan caado u ah in ay isku soo dhawaadaan kan lageeyay ee jiran iyo shaqaalahuba. Shaqaale ku filan oo mar walba jooga waxay suurto galinaysaa in daawayntu waxtar yeelato oo qof walibana baahidiisa ay daboosho. Iyadoo loo adeegsanayo mashaariicda cilmibaaritaan ah oo kala duwan iyo foomam qooni ah oo yaala xafiiska gargaarka bulshada ayaa si joogta loola socdaa loona qiimeeyaa waxqabadka xarumahaas.

Ka danbaynta Dhaqan celinta Dhallinyarada

Idii bisha Jannaayo 1999 wuu isbedelay habkii sharciga loogula dhaqmi lahaa. Waxaa ka mid ah nidaamka cusub ee kama danbaynta dhaqan celinta dhallinyarada. Machadka qaranka ayaa ka masúul ah waafajinta kama danbaynta dhaqan celinta khaasatan guryaha xanaanaynta dhallinyarada.

Taasuna macnaheedu waxay tahay dhallinyarada da' doodu u dhaxayso 15-17 sanno oo gala danbiyo khatar ah in lagu xukumo kama danbaynta dhaqan celinta dhallinyarada intii lagu xukumi lahaa xabsi.

Nidaamka cusub waa wakhti goán xukunku laakiin macnaheedu waa in daawaynta lagu sii wadaa maadaama uu muddada la xukumay uu daganyahay guryaha xanaanada dhallinyarada. Danbiga uu galay ayaa xukunka keenaya ee daawayntu shuqul kuma laha xukunkaas. Sidaas awgeed muddada daawaynta – dhererka, way kala duwan yihiin 14 maalmood ilaa iyo 4 sanno. Xitaa xaaladdan xafiiska gargaarka ee degmada masúuliyad way buu ku leeyahay dhallinyarada la dajiyo guryaha gaarka ah. Machadka qaranka goáanka iyo tala siinta iyo meesha la dajinayo danbiila la xukumay iyo habkii ay u dhici lahayd dajintu.

Dhallinyarada hadda ka hor lagu xukumay xabsi way isku eg yihiin dhaliinyarada kale ee lagu xanaaneeyo siduu sheegayo sharciga xanaanaynta isticmaalayaasha maandooriyaasha (LVU). Taasina waxaa caddeeyay baaritaan lagu sameeyay. Taasu macnaheedu waxay tahay haddii lagu xukumo sharciga isticmaalayaasha maandooriyaha (LVU) ama lagu xukumo kama dabnayta guryaha dhaqancelin, waxay u baahanyihiin in laga daaweeyo isticmaalka maandooriyaasha, danbiyada, xiriirka, iyo dhibaatada ka haysata dhigashada iskuulka.

Dhallinyaradaas la xukumay waxaa gacanta ku haynaya machadka qaranka shaqooyinka caadiga ah ilaa iyo inta ay soconayso xitaa way ka qaadan karaan qaybaha kala duwan ee xanaanaynta. Dhinaca dajinta waa in la tixgaliyaa mujtamaca baahidda iyo difaacidda, danbiyada, muddada xukunka dhererkeeda isla markaana dhallinyarada baxsigooda.

Dhallinyarada wakhtiga iyo qorshaynta u dhawaanshaha wada shaqaynta xafiiska kaalmada. Dhallinyarada ma degnaan karaan guri ay iyagu leeyihiin ama guryaha waalidkood maadaama ay sii xuman karaan inta ku hartay.